
Llywodraeth Cymru
Welsh Government

www.cymru.gov.uk







# Sidee dugsiga ahaa maanta?

## Jahaynta waalidiinta iyo xannaaneenayaasha dugsiga sare

**Da'da 11–14**





# Tusmada


| | |
|---|---|
| Ilmahaygu muxuu bartaa? | 4 |
| Waa maxay imtixaanada akhriska iyo xisaabta? | 14 |
| Sideebaan u caawin karaa waxbarashada ilmahayga? | 16 |
| Sideebaa ilmahayga loo qiimeeyaa? | 20 |
| Warbixinaha dugsiga | 24 |
| U gudubka toosan ee wejiga Key Stage 4 | 26 |
| Xiriir faa'iido leh | 30 |




ISBN: 978-0-7504-9405-2
WG17867 Somali
© Crown Copyright February 2013

Xukuumadda Weleshka waxay aaminsan tahay siinta dhallinta waxbarata saldhig adag ee aayatiinka wuxuu u faa'iideynayaa cunugga iyo Weleshka oo idil waqtiga fog.

Waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha waxay ka ciyaarayaan qeyb muhiim ah horumarinta waxbarasahda caruurtooda iyo, waxaa mihiim sii ah, inay jeclaadaan dugsiga waxna bartaan.

Jaheeyahaan wuxuu ka caawinayaa inuu fasiro waxa cunuggaaga ka baranayo dugsiga sare. Wuxuu kaa siinayaa ra'yi ku saabsan sidaad u caawini lahayd cunuggaaga iyo meeshaad ka heli lahay war saa'id ah iyo wixii kuu fasirayaa sida loo miisaamayo horumarka iyo sidii laguugu soo war gelin lahaa.

Waxbarashada carruurta ee Weleshka wuxuu u qaybsamaa afar qaybtood ama marxaladood.

| **Dugsiga hoose** | | **Dugsiga sare** | |
|---|---|---|---|
| **1** Wejiga Bilowga (Foundation Phase) ee la keeno carruurta da'doodu ay u dhaxayso 3 iyo 7 | **2** Marxaldda Furaha 2 bilowda 7 illaa 11 jir. | **3** Marxaladda Furaha 3 waa laga bilaabo 11 illaa 14 jir. | **4** Marxaladda Furaha 4 wuxuu ardayda qaataa 16 jir. |

**Jaheeyahaan wuxuu fasirayaa manhajka lagu hirgeliyo caruurta dugsiyada sare da'doodu tahay 11 illaa 14 jir ee ku jira Marxaladda Furaha 3.**

Waxaad ka heli kartaa warka ku saabsan heerarka kale ee carruurta waxbarashada **www.wales.gov.uk/educationandskills**

# Ilmahaygu muxuu bartaa?



Carruurta da'daan ah waxay qaadanayaan barnaamijyo waxbarasho lagu dejiyay manhajka qaranka ee Marxaladda Furaha 3. Waxbarashadooda wuxuu ku dhismayaa waaya-aragnimada iyo barashada ay ka helaan dugsiga hoose loo diyaarshay go'aan ka gaarista ku saabsan imtixaanaadka madooyin ay dib u raaci donaan ee waxbarashada dugsiga sare.

Manhajka ee Marxaladda Furahaha 3 waxaa loogu tala gala maadda ahaan iyo xirfad ahaan. Waxaa loo sameeyey inuu siiyo saldhig adag ee luqadda ah, xisaab iyo saynis, wuxuu ardada siinayaa fursad inay helaan waxa ugu fiican manhaj ballaaran miisamanna.

Horumarinta farbarashada fiican iyo xirfadaha xisaabta, iyo isticmaalkooda aag ballaaran ee maxlado kala duwan, waa halbowlaha waxbarashada cunugga marka uu ku jiro dugsiga sare.

Waxaan doonaynaa dhallinta oo idil inay awoodaan inay akhriyaan, qoraan isticmaalaanna lambarada si karti leh iyo kalsooni inay caawinto xulashada aayatiinkooda ee waxbarasho iyo nolol.

Cunuggaaga wuxuu raacayaa manhaj kala duwan qani ah loona sameeyay inuu siiyo fursad inay bartaan:

- Ingiriiska
- Welesha ama luqad Welesh luqad labaad ahaan
- xisaab • saynis
- cilmiga tehnoloojiyadda iyo isgaarsiinta (ICT)
- luqad ajnabi ee carsi • taariikh
- juqraafi • muusik • fanka iyo farsamada
- jimicsiga jirka (PE).

Cunuggaga waa inuu xitaa bartaa waxbarashada diinta (RE) iyo dugsiyada sare waa bixiyaan maadooyin shaqsi iyo bulsho (PSE), shaqo iyo dunida shaqada, waxbrashada isu-tagga.



Dugsi waliba wuxuu go'aan ka gaarayaa tifaftirka cunugga waxa uu baranayo iyo sida uu u habaysan yahay dugsi maalmeedka. Waxay eegayaan baahida aan cadeyney, iyagoo nidaaminaya shax-waqtigeedkooda.

Macallimiinta waxay diyaarinayaan qorshaha duruursta waxayna go'aan ka gaarayaan qalabka iyo siday u isticmaali lahaayeen. Dusgia ayay u taallaa sidee ay u hubin lahaayeen siday u fulin lahaayeen manhajka sida sharci waxa uu qorayo.

Dugsiga cunuuggaga wuxuu ku siin karaa macluumaad intaa ka badan ee ku saabsan sida loo sameeyay manhajka iyo xirfadaha uu cunugaaga uu yeelanayo, iyo tifaftirka cunugaaga waxa uu baranayo.

Waxaad macluumaad saa'ida ka heli kartaa ee ku saabsan waxbarashada iyo manhajka Weleshka www.wales.gov.uk/educationandskills

## Ingiriis iyo Welesh

Carruurta waxay ka qayb galayaan barnaamijyo hadlid iyo dhagaysi, akhrin qoritaan.

Hawl-gallada wuxuu hubinyaa in carruurta horumarto iyo inay fidiyaan kartidooda maqlaa ahaan, eegaa ahaan iyo hadlaa ahaan.

Carruurta waxay akhrinaysaa ka helitaan ahaan, ka-helitaan-ahaan iyo war ahaan iyo horumaan iyo fasiraan aragti shaqsiyeed ee ku saabsan akhrinta.

Waaya-aragnimada la hor dhigay waxaa ka mid ah fursad inay ka qayb galaan fan-masraxeed iyo hawl-gallo.

Waxay yeelanayaan faham korriisimo baahida loo baahan yahay in bartaan inay hadalkooda iyo qoraalkooda uu ku aadisan yahay ujeedooyin badan iyo dhegaystayaal.



## Welesh luqadda labaad

Cunugaaga maadaama uu sii helayo kalsooni ku hadalka Welshka, waxaa dhismaya qibradooda, aqoontooda iyo fahamkooda ay ka helayaan barnaamijka oraahda, akhrinta qorista.

Kartida carruurta maqla ahaan, eega ahaan ama hadlaa waa dhismayaan wayna hore marayaan waxayna ku sii hadli si bulbul ah.

Waxay helyaan fursado inay ka qayb galaan madadaalasho iyo hawl-gallo ciyaareeed.

Waxay awoodi donaan inay bandhigaan fikirkooda shaqsiyeed ee ku saabsan waxa ay akhrinayaan, iyagoo uga jawaabaya si toosan tirsida iyo noocadda.



## Xisaab

Carruurta waxay fidiyaan fekerkooda xisaabeed iyagoo isticmaalaya xujooyinka xisaabaha, u shaqanaya kalsooni saa'id ah iyo firfircoonida xallinta xujooyinka aysan garanayn ama ka mid tahay aragti aan caadi ahayn, hawlo ah hadal iyo qoraal, u fasiraya sababta dad kale, isticmaalayana aragti xisaabo kala duwan ee loo adeegsado nolosha runta ah.

Carruurta waxay fidinayaan fahamka iyo sababta loo doodo markay la kulmaan jidad kala duwan xallinta xujooyinka iyo fasiraada aljebrada iyo joometriga. Inay bartaan faham hoose ee muuqaallada, goobta iyo dhaqdhaqaaqa iyo uruurinta, tusaalaynta, fasiradda qodobada xaqiiqada ah.



## Saynis

Dugsiyada waxay baraysaa carruurta sida ay u isticmaalaan xirfadaha sayniska, aqoonta iyo fahamka inay farsameeyaan aragtida fog, xalliyaan xujooyinka iyo soo bandhigaan fasiraad, la xiriira araa'da sayniska macluumaadka ku saaban arrimaha, ay ka mid tahay arrimaha hadda jira.

Waxaa la siinayaa fursado inay u shaqeeyaan saynis ahaan iyo inay aqoonsadaan aragtida tijaabada, fekerka hal-abuurnimda iyo qiimaynta shaqooyinkooda iyo samaynta aaraa'da sayniska.

## Luqaddaha ajnabiga ee casriga ah

Cunuggaga wuxuu fursad u helayaa inuu yeesho xirfado xiriirin ee luqad ajnabi ee casri ah. Luqadda gaarka ah ama luqadda la siiyay waxaa go'aan uga gaaraya dugiyada.

Iyagoo baranaya xirfadda barashada oraahda, akhrinta iyo qorista, carruurta waxay xitaa baranayaan faham dhaqan-is-dhex-galka iyo micnaha loogu noolaado addunka, waxay baranayaan inay qiimeeyaan dhaqannada kala duwan iyo bulshooyinka iyagoo kula barbardhigaya kooda. Waxay baaryaan isku mid ahaanshaha iyo kala duwanaanta u dhexeeya luqadaha kale iyo Ingiriiska iyo Weleshka.

Carruurta waxaa lagu dhiiri gelinayaa kartida inay fahmaan xiriiriyanna luqadaha kale inay tahay xirfad nololeed, madaalayn iyo shaqo waddankaan iyo addunka.



## Sawiridda iyo teknoloojiyadda

Iyadoo lagu xisaabtamayo is-debberaadda iyo arrimaha bay'adda ee qarniga kow-iyo-labaatanaad, dugsiyada waxay carruurta barayaan inay sanceeyaan isla markaasna sameeyaan abuurka isku-darka xirfadooda iyo fahamka aqoontooda. Waxaa lagu dhiirigelinyaa inay go'aan gaaraan ku salaysan qiimaynta salka u ah bulshada, iyadoo lagu caawinayo inay noqdaan dadka ku hawl-gala wadaniyad ahaan. Waxay ogaanayaan guul-gaarista bani-aadamka iyo ra'yiga waawayn ee sameeyay addunka maanta.

## Cilmiga tehnoloojiyadda iyo isgaarsiinta (ICT)

Carruurta waxay ka dul-dhisayaan qibradooda, aqoontooda iyo fahamkooda dareen koraya qiimaynta wararka siday mihiim u tahayiyo inay ogaadaan su'aalaanna warka qaloocan.

Waxaa la barayaa inay xor sii noqdaan siday u isticmaalaan wararka amaanada ah oo haboon, labada Cilmiga tehnoloojiyadda iyo isgaarsiinta iyo kuwa aan ahayn Cilmiga tehnoloojiyadda iyo isgaarsiinta, iyo sida loo isticmaalo xirfado kala duwan ee Cilmiga tehnoloojiyadda iyo isgaarsiinta iyo sida loo helo loona micneeyo, xiriiriyo, loo bandhigo loona qaybsado. Waxay noqonayaan inay yeeshaan dareen bulshadeed, xishmadeed, damiir ahaaneed iyo waxa ay u keeni karto bulshada dhaqaale ahaan Cilmiga tehnoloojiyadda iyo isgaarsiinta.



## Taariikh

Carruurta waxay wax ku baranayaan su'aal ahaan, iyagoo foodda saaraya arrimaha waaweyn ee siyaasadeed, dhaqaale iyo dhaqan ahaan ee waqtiyo la soo xulay ee taariikhda Weleshka iyo Biritan xilliga kunkii sano ee ugu dambeysey. Waxay baranayaan waaya aragnimada kala duwan ay dadku lahaayeen xilliyadaas iyo inay yeeshaan fahamka sababaha dhacay iyo siday u dhaceen usuna beddelay waqtiga.

## Muusik

Carruurta waxay la hawl-galayaan kana helayaan samaynta musikada iyagoo jilaya, allifaya iyo qiimaynaya. Waxay yeelanayaan qibrad muusik la xiriira heesida iyo garaacidda qalabka, laylinta, habaynta muusikada. Waxay kaloo baranayaan inay dhegeystaan iyo inay qiimeeyaan muusikada.

## Juqraafi

Carruurta waxay ballaarinayaan aqoontooda iyo fahamkooda sida loo fahmo muuqaalka nolol ahaan iyo dhul ahaan. Waxay samaynayaan baaritaan, isticmaalayaan qariidado, uruurinayaan war, iyo fasiraya kala shaandheenaya wararka.

Waxaa lagu dhiiri-gelinayaa inay sameeyaan go'aan xogeed ee ku saabsan arrimaha maanta jira, sameeyaan aragtidooda ku salaysan iyo arrin masuuliyadeed ee bay'adda ku saabsan iyo kaalindooda dunida.



## Fanka iyo farsamada

Carruurta waxay yeelanayaan karti saa'id ah inay isku xiraan siday u sameeyaan shaqadooda iyo shaqada fannaaniinta kale, farsamayaqaanka iyo saaniciinta. Waxay noqonayaan dad xor ah xulashada alaabada iyo noocadaha, iyo inay isticmaalaan waaya-aragnimo hore waxay sii yeelanayaan kalsooni isticmaalka alaabada la arko, faraha iyo dareenka luqadaha.

## Jimicsiga Jirka (PE)

Maadaama ay kalsoonida caruurta ay korayso, kartidooda inay ka qayb galaan hawl-gallada noqonaysa teknika ahaan way sii kordheysaa. Waxay wax ka baranayaan faa'iidada la shaqaynta dadka kale si ay u xoogowdo koox ahaan ama wax-wadaag ahaan si looga guulayso dad kale. Waxay kaloo baranayaan inay layliyaan dhacdooyinka.

Dugsiga waxaa lagu dhiiri-gelinayaa carruurta inay fahmaan wax la qabadka inay u faa'iidenayso caafimaadkooda iyo jismigooda iyo waxayna siinaysaa masuuliyad wanaagga caafimaadkooda.

## Muxuu kaloo cunuggayga baranayaa?

Barbar socodka manhajka qaranka, madooyinka dugsiyada waa inay bixiyaan warbarashada diinta (RE) iyo warbarashada shaqsiyeed iyo bulsho (PSE).

Muhiim ahaan, waa masuuliyadda dugsiga inuu qorsheeyo buuxiyana barnaamij miisaaman ee RE, PSE and isu-tagga oo loogu tala galay in lagu kifeeyo baahida ardayda.



## Akhris-qoraal iyo xisaab

Laga bilaabo bisha Sibtembar ee sannadka 2013 waxaa si rasmi ah loo keeni doonaa Qaab cusub oo Xisaabta iyo Akhris-qoraalka ah oo heer Qaran ah loona soo gaabiyo (LNF) si ay u caawiso caruurta da'doodu u dhaxeyso 5 ilaa iyo 14 jir si ay kor ugu qaado xirfadahooda xisaabta iyo ahris-qoraalka.

Carruurta oo idil waxaa lagu taageerayaa farbarashada wacan iyo xirfadaha lambarrada. Xirfadahaan ma aha oo keliya barashada Ingiriiska, Weleshka iyo xisaabta, waa kartida isticmaalka xirfadaha marxaladaha kala duwan iyo isticmaalista hawl-gallada kala duwan.

Farbarashada waxay fasiraysaa xirfado dhow ah, ay ku jirto hadalka, maqalka, akhrinta iyo qorista, kaas oo noo masaamaxaya inay micna noo yeelato dunida nagu hareeraysan

Lambarinta wuxuu ku salaysan yahay xisaabta asaasiga. Xisaabinta wuxuu fasirayaa xirfadaha loo baahan yahay in la xalliyo xujooyinka nolosha runta ah marxalado kala duwan iyadoo la isticmaalayo xaqiiqada lambarinta si loo qorhseeyo xallinta xujada, kadibna la isticmaalo nidaamka xisaabta si loo helo xal.

LNF waxaa ay tilmaantaa heerka sannad walba laga sugayo xisaabta iyo akhris-qoraalka waxaana ay caawinaysaa caruurta in ay kor u qaadaan xirfadaha xisaabta iyo akhris-qoraalka ayagoo adeegsanaya dhammaan maadooyinka ku jira manhajka qaranka iyo weliba ayadoo la adeegsanayo nashaadyo kala duwan.

# Waa maxay imtixaanada akhriska iyo xisaabta?



## Imtixaanada Qaranka

Sida ugu wanaagsan ee loo sugi karo in ardeydu horumar sameyneyso waa in la hubsado in aysan ebid dib u dhicin. Arintani waxaa uun lagu gaari karaa in si joogta ah loola socdo loona qiimeeyo heerka waxbarashada ardeyga taas ayaana u sabab ah in laga bilaabo bisha Maajo sannadka 2013, dhammaan ardeyda ku sugan Wales ee ku jirta sannadka labaad ilaa iyo sannadka sagaalaad ay u fariisan doonaan imtixaanka akriska iyo xisaabta.

Imtixaanku wuxuu socon doonaa mudo hal saac ah waxaana loo qaabeeyey in ardeyda qaarkood ay u fariisan karaan "si qeyb qeyb ah"

Arintani waxaa ay si gaar ah muhiim ugu tahay ardeyda da'da yar iyo kuwa leh baahiyo waxbarasho dheeraad ah. Iyadoo ku xiran baahida mid kasta oo ardeyda ka mid ah, waxaa imtixaanka loo qaadi karaa sanad sanad, fasal fasal amaba koox koox yar.

## Imtixaanada Akhriska

Imtixaanada akhriska waxaa loo qaadayaa laba laba sannadood kooxdiiba (Sannadka 2 – Sannadka 3, Sannadka 4 – Sannadka 5, Sannadka 6 – Sannadka 7 iyo Sannadka 8 – Sannadka 9). Imtixaano cusub ayaa la keeni doonaa sannadka 2014 markaa ma jiri doono ardey isla hal imtixaan laba mar u fariisan doona.

Imtixaanadu waxaa ay ka koobnaan doonaan qoraalo dhowr ah oo ay ku xigto su'aalo yar yar oo kala dooro jawaabahooda ah. Sidoo kale waxaa jiri doona imitixaanno kale oo la yaalla dugsiyada una bannaan in ay adeegsadaan si ay u qiimeeyaan meelaha ay ardeydooda ku fiican yihiin iyo meelaha ay ku liitaan.

## Imtixaanada Xisaabta

Imtixaanada xisaabta waxaa ay u qeybsan yihiin labo qeybood. Hal qeyb waxaa ay qiimeyneysaa wadiiqooyinka aqoonta xisaabaha sida isku darka, isu qeybinta, isku dhufushada qeybta kale ee ah imtixaanka sababaynta, waxaa ay qiimeysaa awooda uu ardeyga u leeyahay in uu aqoontan ku dabaqo mushkiladaha maalin walba ah.

Sannadka 2013 imtixaanka xisaabta waxaa uu qiimeynayaa oo keliya wadiiqooyinka xisaabaha. Arintani waxaa ay macalimiinta fursad u siineysaa waqti ay qaabkooda waxbaridda ku waafajiyaan barida xisaabta waxaana ay sugeysaa in ardeydu ay ogaadaan howlaha la horkeeni doono marka ay u fariistaan imtixaanka xisaaabta qeybta fahamka marka la gaaro bisha Maajo ee sannadka 2014.

# Sideebaan u caawin karaa waxbarashada ilmahayga?

Ka-qayb-qaadashada waalidka waa muhiim caawinaadda barashada carruurta. Waxaad ku caawini kartaa horumarka iyo waxbarashada cunugga adigoo ka qayb qaadanaya dhaqdhaqaaqyada, ma aha oo keliya aqalka xitaa beerta, xadiiqadda iyo dukaamada Qiima geli kalana hadal qodobada ay dugsiga baranaaan iyo isku day inaad hubiso inay la haystaan waxbarashadooda iyo inay sameeyaan layli-gurigooda.

## Araa' waxbarasho ee aqalka

- Dhiirigelinta inuu cunugga wax akhriyo, xitaa 10 daqiiqadood maalintii, wax badan ayuu ka beddeli karaa. Alaabada la akhriyo way kala duwanaan karaan, ku dhiiri gelin cunuggaga inuusan akhrin buugaagta iyo warsidayaasha oo keliya laakiin shabakadaha, barnaamijyada, ciyaaraha iyo wixii la mid ah.
- Isha ku hay waxyaabaha cusub ee wararka laga sheego oo caawinaya carruurta inay yeelato xaaladaha degaanka, qaranka iyo bulshada adduunka. Isku day inaad ku dhiiri-gelisid inay akhriyaan wargeysyada ama wararka shabakada mar ama laba jeer usbuucii.

- Marka laga hadlayo qarashka guriga, la hadalkooda waxa ka muuqda qarashaka iyo xulashooyinka kale ee kala duwan sida loo bixinayo. Tani waa xirfad qiima badan ee abid ah.
- In la hawl-geliyo carruurta qorshaha safarta, fasaxyada dhacdooyinka iyo xitaa arrimaha guriga iyo Iska-Wax-u-Qabso.
- Isku day inaad la xiriirisid qaar ka mid ah hawl-gallada qoyska usbuuc-fasaxeedyada waxa laga hadllo la baro. Waxay ku caawinaysaa inay u noqoto waxbarashada wax uu ka helo.
- Xususuusnow, hawl-gallada ay ku jirto isticmaalka internetka, ciyaaraha waxay siiyaan qiimayn aad qaali u ah inay isticmaalaan xirfadaha aqoonta.
- Ku dhiiri geli cunugaaga inuu sameeyo inay ku dadaalaan layli-guriga iyo inay dhammeeyaan waqtiga loogu tala galay.



## Xaadirida dugsiga

Laasun, sida ugu fiican oo aad cunugaaga waxbarashadiisa ku caawini kartid waa inaad hubiso inaysan duruusta ka maqnaan. Sidaas, sii cunugaaga bilowga ugu fiican ee nolosha adigoo hubinaya inay dugsiga yimaadaan goor waliba.



## Cunugga u qaba baahida gaarka ah ma raacayaa manhajka qaranka?



Inta badan carruurta, ay ku jiraan kuwa u baahan barasho sa'id ah, waxay awoodaan inay raacaan manhajka qaranka. Laakiin, mararka qaar, madaxa-dugsiga wuxuu go'aan ka gaari karaa inuu kulli ama qaar ka mid ah manhajka qaranka laguma fulin karo, si kumeel-gaar ahaan, cunug u qaba baahi gaar ee waxbarshadeed. Kiisas gaar ah carruurta qaar, sida kuwa Tiraabka Baahida Gaarka Waxbarasho (Statements of Special Educational Needs) oo ay bixiso masuuliyadda degmada, waxay go'aan ku gaari kartaa in manhajka qaranka inaan lagu fulin karin si joogta ah. Tani waxaa loo yaqaan 'lama-isticmaalikaraan'.

Waxaad ka heli kartaa war ka sii badan waxa carruurta la siiyo ee u baahan waxbarasho saa'id ah halkaan www.wales.gov.uk/educationandskills

# Ma kala noqon karaa cunuggayga manhajka qaranka?

Ma jiro wax xuquuq ah uu waalidku kala bixi karo cunuggiisa maadooyinka manhajka qaranka, ama diyaarin lagu qiimeeyo horumarka barashada maadooyinkaan. Laakiin, waxaa xaq u leedahay inaad kala noqoto cunuggaga waxbarashada diinta ama isu-tagga la bixiyo.



# Sideebaa ilmahayga loo qiimeeyaa?



Maadda waliba ee manhajka qaranka wuxuu leeyahay baratankiisa u gaarka ah kaasoo oo daboolaya tillaabooyin dhowr ah, ama heerar, la siman miisaan qaran. Maadda waliba gudaheed, horumarka cunugaaga waxaa lagu qiimeynayaa heerka qaranka iyadoo ay ku salaysan tahay sideed heer iyo Samayn Gaar ah (Exceptional Performance (EP)). Tani waxay macallinka ku caawinaysa inuu qorsheeyo duruusta iyadoo la eegayo da'da iyo kartida, iyo caawinaadda horumarka cunugga.

Macallimiinta waxay qiimaynayaan hawlaha maalinba maalinta ku xigta, maadda ahaan iyo hawl-gal ahaan. Gaar ahaan, waxay qiimeynayaan horumarka maadooyinka hal-bowlaha ah ee Ingiriiska, Welesh (luqadda koowaad ama tan labaad), xisaab iyo saynis.

Macallinka wuxuu go'aan ka gaarayaa heerkee miisaanka manhajka qaranka ayuu cunugga horumarkiisa jooga maaddo waliba kuwa hal-bowlaha ah. Qiimayntaan wuxuu muujinayaa dhinacyada badan ee hawhsa cunuggaaga ee dugsiga iyo layli-guriyeedka.

# Sideen u ogaanayaa in cunuggayga uu la qabsaday?



Waxaad heli doontaan warbixin qoran ee ku saabsan horumarka cunugaaga ugu yaraan sannadkii hal mar. Waxaad heli doontaa fursad inaad la kulanto macallinka cunugaaga.

Warka qiimaynta manhajka qaranka waxaa ka mid ah warbixin sannadeed. Warbixin sannadeedka waxaa ku jira falcelin macallin ee ku saabsan meelaha uu ku xoog badan yahay iyo meelaha u baahan in wax laga qabto, imaatinkiisa iyo guul-gaaristiisa. Warbixinta wuxuu noqon doonaa saldhigga wada hadalka cunugaaga baahida waxbarasho iyo waxa xiga.

Dhammaadka Marxaladda Furaha 3 warbixinta cunugaaga waxaa la socda darajada manhajka qaranka maaddo waliba. Tani waxay ku siinaysaa aragti 'sawireed' ee horumarka cunugga iyo heerka guul-gaaristiisa ee la xiriira heerka manhajka qaranka

Warbixinta waxaa xitaa la socda war sida natiijada loogu barbardhigo dugsiga oo idil iyo darajada xaafadda iyo qaranka.

Wixii macluumaad ka badan ee ku saabsan dugsiga waxaad eegtaa www.wales.gov.uk/educationandskills

# Heerarka manhajka qaranka

## Natiijada Manhajka Qaranka (National Curriculum Outcomes) 1, 2 and 3

Macallimiinta waxay ka warbixin karaan horumarka cunugga ku hawlan tillaabada ugu horeysa ee manhajka qaranka iyagoo isticmaalaya saddex tillaabo 'natiijada' soo baxa heerka guul-gaarista ee Heerka 1.

## Mahnajka Qaranka Heerka 1, 2 ,3 and 4

Ee caruurta qaar, samaynta ka hooseeya heerka laga filayo waa guul-gaaris wayn.

## Mahnajka Qaranka Heerka 5

Tani waa tan laga filayo heerka canugga dhammaadka Marxaladda Furaha 3 – laakiin maha inta badan carruurta waxay gaaraan guul-gaaristaan heekaan.

## Mahnajka Qaranka Heerka 6, 7 and 8

Guul-gaaris ee Heerka 6 ama ka sii koreeya waxay tusaysaa inuu gaaray heer ka sarreya caadi ahaan.

## Saamayn Gaar (Exceptional Performance, EP)

Carruurta qaar waxaa laga filayaa inay gaaraan meel ka sarraysa heerka laga filayo.

## N (Maya) – heerka Abaal-marin la'aanta

Caadi ahaan ma dhaco, waxaa jira xaalado ka hor istaagaya dugsiga inaysan hayn war buuxa iyo wax cad uu macallin ku saleeyo qiimaynta.

## D Lama-isticmaalikaraan – (Disapplied)

Mararka qaar madaxa dugsiga wuxuu go'aan ka gaaryaa kulli ama qaar ka mid ah manhajka dugsiga inaan lagu hirgelin karin qof, matal ahaan sababta baahida warbarasho ee gaarka ah ee cunugga.

Waa muhiim in la xusuusto in carruurta kale gaaraan darajo kala duwan, laakiin ugu dambaynta dugsiga hoose wuxuu ka filayaa cunugga inuu gaaro Heerka 4 ee misaanka manhajka qaranka ee maada waliba.

Wixii macluumaad ka badan ee ku saabsan fasiraadda heerarka manhajka eeg www.wales.gov.uk/educationandskills



## Qoraal ka samaynta iyo derajaynta imtixaanka tijaabo ee akhriska iyo xisaabta

Imtixaanada tijaabada waxaa lagu sixi doonaa dugsiyada dhibcaha ay ardeydu keenaana waxaa loo badeli doonaa darajooyinka caadiga ah iyo derajooyin da'dooda u dhigma. Darajooyinka caadiga ah waxaa ay muujin doonaan sida dhibcaha uu imtixaanka ka keeney ubadkaagu ay ugu barbar dhiganto caruurta kale ee la da'da ah oo imtixaankana ka fariistey Wales. Darajada u dhiganta caruurta la da'da ah waxaa ay kuu sheegeysaa in da'da akhriska ilmahaaga (amaba tan la midka ah ee xisaabta) ay u dhiganto, ka koreyso amaba ka hooseyso da'dooda rasmiga ah, ayadoo ku saleysan sida ubadkaagu imtixaanka uga gudbey. Waxaad darajooyinkan ku heli doontaa warbixin lagaaga soo direy dugsiga ilmahaaga.

Darajooyinka waxaa ay kuu yihiin hage ku tusaya sida ubadkaagu uga gudbayo akhriska iyo xisaabta. Macallinka ilmahaaga ayaa ku siinaya sawirka buuxa ee sida ubadkaagu uga gudbayo meelahan isagoo ku siinaya warbixinta marka xilligu dhamaado.

# Warbixinaha dugsiga



## Yaa xaq u leh inuu helo warbixinta iyo warar kale ee dugsiga?

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqul warbixinta dusgia cunugaaga. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqul warbixin-sannadeedka maareeyayaasha dugsiga.

Waalidiinta aan wada joogin ama is-furay ama kuwa kale waxay yeelan karaan mas'uuliyad waalideed cunug waxayna xaq u leeyihiin warkaan illaa haddii ay u diidayn amar maxkamadeed.

Wixii war saa'id ee ku saabsan masuuliyadda waalidiinta/ xannaaneeyayaasha eeg www.wales.gov.uk/educationandskills

## Ma u baahan tahay macluumaad ka badan?

Waxaad macluumaad saa'id ah ka heli kartaa meelahaan.

- Dugsigaaga – la hadal macallinka dugsiga ilmaha, madaxa dugsiga ama xubin ka mid ah guddiga gudoomiyayaasha.
- Madaxda degmadaada.
- Inaad eegto shabakadda eeg shabakdayada www.wales.gov.uk/educationandskills www.wales.gov.uk/schoolsinfo4parents
- Inaad eegto Careers Wales website ee www.careerswales.com

## Yaan la hadli karaa haddii aan walwal qabo?

Haddii aad qabtid walwal, waa inaad la hadashaa macallinka cunugaaga marka hore. Hadduu dugsiga cunugaaga uu sameeyay qofka ugu horreeya ee aad kala xiriiri kartid arrimaha walwalka ama ashtakooyinka, waa inaad qofkaan la hadashaa.

Haddii aad weli walwalsan tahay, waxaa arrimahaaga u samayn kartaa dacwad ahaan. Siyaasadda dugsiga ee maamulista dacwadaha waxay kuu sheegayaan sida laga yeelo arrimahaan.

## Hormo-gelinta Dugsiga

*Hormo-gelintu ma aha oo keliya in magac fiican iyo mid xun lagu dhejiyo, amaba la sameeyo liiska heerarka kala duwan ee dugsiyada. Balse waa in dugsiyada la kala geliyo kooxo kooxo si loo kala ogaado midka caawinaada u baahan iyo kuwa ay tahay in wax laga barto. Hormo-gelintu waxaa ay Wales oo dhan ka caawineysaa in dugsiyada lagu sameeyo horumarin la taaban karo. www.wales.gov.uk/schoolsinfo4parents*

# U gudubka toosan ee wejiga Key Stage 4

Carruurta ku jirta labada sano ee ugu danbeeya waxbarashada qasabka ah waxay raacayaan manhaj ay ku jirto Ingriis, Welesh, xisaab iyo saynis.

Tani waxay siinaysaa inay wataan waxbarashadooda jismi, diinta, shaqsi iyo bulsho, isu-tagista iyo inay bartaan waxa ku saabsan shaqada iyo adduunka shaqada.

Intaa waxay raacayaan xulashada tabarrada ku jahaysan shahaadooyinka sida Shahaadada Guud ee Dusgiyada Sare (General Certificates of Secondary Education (GCSEs)).

Dugsiga wuxuu siinayaa macluumaad iyo caawinaad dhallinta iyo waalidiintooda/xanaaneyaashooda si ay uga caawinto go'aamada ku saabsan carrurtooda marka ay jiraan 14 iyo wixii ka sareeya.

# Xulashada Marxaladda Furaha 4

Sannadkii hore ee Marxaladda Furaha 3 (Sanad 9), dadka da'da yar ee ku jira dugsiga sare ee ay hayaan masuuliyiiinta degmada waxay bixinayaan ugu yaraan 30 xulasho tababareed. Ugu yaraan shan ka mid ah waa tababarada gaagaaban ama aad shaqaalayn – ama ku salaysan tababarro laylin.

Tani waxay u masaamaxaysaa inay raacaan manhaj ballaaran iyo inay xushaan tababar ay xiisaynayaan isla markaasna himmad gelinaysa. Tani waxay ka caawinaysaa inay guul-gaaraan ugu dambaynta Marxaladda Furaha 4.

Dhallinta ku jirta Marxaladda Furaha 4 waxay helayaan hawl-gallada taageerada dadka waxbarta, ay ka mid tahay tababarayaal, ka caawiya sida ay uga tallaabsan lahaayeen xatabadaha waxbarashada.



## Shahaada Jaamacadda ee Welesh

Dugsiyada inta badan ee Welesh waxay xitaa baxshaan Shahaada Jaamacadda Welesh. Waxay leedahay laba qaybood – hal-bowlaha iyo xulashada. Qaybta hal-bowlaha waa qasab wuxuu ka samaysan yahay shan qaybood;

- Xirfadaha Muhiimka ee Welesh (Essential Skills Wales) and Furaha Xirfadda
- Waxbarasho la xiriirta shaqada
- Welesh, Yurub iyo addunka
- Waxbarsho shaqsiyeed iyo bulsho
- Baaritaan shaqsiyeed.



Ardayda waxay xulanayaan shahaado ay ka xulanayaan xulashada dugsiga ka jira ku jahaysan heerkooda. Tani waxay noqon kartaa Shahaadada Guud ee Dusgiyada Sare (General Certificates of Secondary Education (GCSEs)) ama tababarada xirfadnimada sida ku haboon qofka.

Iyadoo laga tix-raacayo dib u eegista shahaadooyinka dadka da'doodu tahay 14 - 19, Dowladda Welshiga waxaa ay isbedel ku sameyn doontaa maadooyinka shahaadada Welsh Baccalaureate oo bilaaban doonta Sibtembar sanadka 2015.

Wixii macluumaad dheeri ah oo ku saabsan shahaadada Welsh Baccalaureate ka soo booqo bogga: www.wales.gov.uk/topics/ educationandskills/ qualificationsinwales/ qualificationtypesinwales/welshbac

ah oo ku saabsan dib ugu noqoshada shahaadooyinka ka soo booqo bogga: www.wales.gov.uk/ topics/educationandskills/ qualificationsinwales

# Tixgelinta shaqada iyo adduunka shaqada ee Marxaladda Furaha 4

## Muxuu cunugayga filayaa?

- Shaqaalaynta iyo adduunka shaqada waa qayb muhiim u ah manhajka iyo diyaarinta cunugga ee aayatiinka shaqaalaynta. Dugsiyada waa inay hubiyaan in cunugga uu helo fursad inuu wax ku barto ee ku saabsan aduunka shaqada, xirfado, aqoon iyo shahaado ay shaqada u baahan tahay, xulashada shaqaalaynta ay leedahay.

- Waaya aragnimada shaqada waa wax u mihiim ah cunugga jira 14 illaa 19. Waxay siinaysaa fursad inay horumariso aqoontiisa iyo fahamkiisa, iyo xirfadaha ay ugu baahan yihiin, adduunka shaqada, iyo hawl-gelinta.

  Tani waxay cunugga siinaysaa inuu waaya'aragnimo ka qaato goobta shaqada. Inkastoo aysan jirin baahi saaran dugsigaada inay siiyaan ardayda waaya-aragnimada, qaar badan way sameeyaan.



# Xiriiro faa'iido leh oo loogu talagaley waalidiinta caruurta da'doodu u dhexeyso 11-14 jir

Liiskan xiriirada faa'iidada leh waxaa ay kaa caawinayaan waalid ahaan in aad hesho macluumaad dheeraad ah oo aad ku caawiso caruurtaada.

*__Bitesize__ waa isha waxbarasho ee BBC-da ee internet-ka oo lacag la'aan ah si ay uga caawiso caruurta degan UK howlaha dugsigooda.
www.bbc.co.uk/bitesize

*__Childline__ waa adeeg qarsoon oo shaqeeya 24 saacadood looguna talagaley caruurta iyo dadka da'da yar ee ku nool UK gudaheeda ee la tacaalaya walaac kasta oo ku saabsan laga bilaabo xadgudubka caruurta ilaa iyo mukhaadaraadka.
www.childline.org.uk

*__Lovereading4kids__ waxaa uu kaa caawinayaa in aad ka raadisid buugaag xiisa gelinaya caruurta kuna caawinaya in ay jeclaadaan wax akhriska.
www.lovereading4kids.co.uk

***Sumdog** waa bog internet-ka oo soo bandhiga ciyaaro ka dhigaya xisaabta wax lagu raaxeysto. Kuligood waa lacag la'aan si loogu ciyaaro isagoo ku siinaya khiyaar aad lacag ku bixin karto si aad u hesho kuwo dheeraad ah.
www.sumdog.com

**Apprenticeships** waa shahaado xirfradle ah wax ka ogow kuwa ka jira Wales, iyo sida ay barnaamijyadan ugu haboonaan karaan ilmahaaga. Ka eeg www.wales.gov.uk ka sii aad meesha ay ku qoran tahay Apprenticeships Wales and Parents section. www.wales.gov.uk

**Change4life** waxaa uu ku siinayaa fikrado iyo si loo kariyo cunnooyin kaa caawineysa adiga iyo qoyskaagaba in ay ahaadaan kuwo ka faraxsan kana caafimaad badan. www.change4lifewales.org.uk

**Sidee yahay dugsiga ilmahaaga?**
Waa bog bixiya macluumaadka heerarka dugsiyada ku yaalla Wales.
www.mylocalschool.wales.gov.uk

***BBC Talooyinka waalidiinta**
Laga bilaabo caawinaada homework-ga ilaa iyo caawinaada baahida waxbarashada dheeriga ah, halkan ka eeg sidaad ilmahaaga dugsiga ugu caawin laheyd. www.bbc.co.uk/schools/parents

**MEIC**
Waa adeeg qarsoon oo loogu talagaley caruurta iyo dadka da'da yar ee ku nool Wales. Waxaa laga heli karaa caawinaad ku saabsan laga bilaabo waxa ka socda xaafadaada iyo caawinaad sida looga hortago dulminta. www.meiccymru.org

**Careers Wales**
Waxaa laga helayaa macluumaad iyo talooyin ku saabsan sida ilmahaaga looga caawiyo in uu shaqada mustaqbalkiisa doorto.
www.careerswales.com

**Estyn**
Macluumaad dheeri ah ka ogow heerka uu ku jiro dugsiga ilmahaaga. www.estyn.gov.uk

** Fadllan xusuusnow in boggan internet-ka uu ku qoran yahay af Ingiriis oo keliya.*

